

## Ogeysiis Sannadeedka 2020-21 ee Imtixaanada Gobolka oo Dhan

### DHAMMAAN ARDAYDA QALINJEBINTA U DIYAARSAN

Sannadkii 2010, Oregon waxay qaadatay heerarka sare ee K-12 ee farshaxanka luqadda Ingiriisiga iyo xisaabta si loo xaqiijiyo in dhammaan ardayda ay uga kala gudbaan fasallada iyagoo leh aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah guusha dugsiga sare kadib. Waxaan hagaajinay qorshaha imtixaanka 2020-21 si ay ugu saamaxdo in la sameeyo qiyaasta la isku halleyn karo ee waxqabadka ardayda, iyadoo hoos loo dhigayo waqtiga ay ardayda ku jiraan imtixaanka.

#### Maxay ka qeybqaadashadu muhiim u tahay?

In kasta oo uusan jirin hal imtixaan oo sawir buuxa ka bixinaya horumarka ilmahaaga, haddana in ilmahaaga laga qaado imtixaanada gobolka oo dhan waxay siinaysaa barayaasha iyo maamulayaasha macluumaad heer nidaam ah oo ku saabsan hababka waxbarashada ee shaqeynaya iyo halka loo baahan yahay in lagu kaabo ilo dheeraad ah. Ka qeybgalka ilmahaagu waa muhiim si loo xaqiijiyo in dugsiyada iyo degmooyinku ay helaan ilaha bartilmaameedsan ee ay u baahan yihiin si looga caawiyo dhammaan ardayda inay guuleystaan, gaar ahaan kuwa ka soo jeeda taariikh ahaan dadyowga aan si buuxda loogu adeegin.

#### Sharaxaadda xuquuqda

Qodob Sharciyeedka 2655 wuxuu u fasaxayaa waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah inay sannad kasta ka baxaan imtixaannada gebogabada ee gobolka Oregon oo dhan ee farshaxanka luqadda Ingiriisiga iyo xisaabta iyagoo u gudbinaya foom sannadle ah dugsiga uu ardaygu dhigto. Dugsiyadu waxay waalidiinta siin doonaan foomka sannadlaha ah ee 2020-21 ugu yaraan 30 maalmood kahor bilowga imtixaanka. Booqo liinkigan si aad wax badan uga oggaato Qoddob Sharciyeedka 2655: <http://tinyurl.com/OR-HB2655>.

### XILLIYADA IMTIXAANAADKA GOBOLKA OO DHAN

Dugsiga Sare ee farshaxanka luqadda Ingiriisiga & xisaabaadka  
imtixaannada gebogabada  
Janaayo 5 - Juun 4, 2021

Fasalada 3-8 Farshaxanada luqadda Ingiriisiga & xisaabaadka  
imtixaannada gebogabada  
Maarso 4 - Juun 4, 2021

### IMTIXAANADA GOBOLKA OREGON

- Waxay ka caawiyaan aqoonsiga dugsiyada iyo degmooyinka u baahan taageerooyin dheeri ah si loo xaqiijiyo in arday badan ay gaaraan heerar sare
- Waxay ku xujeeyaan ardayda inay si qoto-dheer u fikiraan una adeegsadaan aqoontooda dhibaatooyinka dunida dhabta ah
- Waxay adeegsadaan shay qaabeedyo badan si loo xaqiijiyo qaabab badan ee lagu heli karo waxa ku jira sheyga
- Waxay u shaqeysaa sida tusmo yar oo muujinaysa horumarka ilmahaaga waxaana laga yaabaa in lala tixgeliyo qeybo kale oo macluumaad ah si loo fahmo awoodda iyo baahida waxbarasho ee ilmahaaga

#### Goorma ayuu ilmahaagu imtixaanka galayaa?

Ilmahaaga hal mar ayaa la imtixaami doonaa. Dugsiga ilmahaaga ayaa go'aamin doona taariikhaha gaarka ah ee uu ilmahaagu qaadanayo imtixaannada gudaha xilliga imtixaanka ee gobolka oo dhan.

### XOG OGAAL AHOW

La hadal macallingka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga haddii aad wax su'aalo ah qabto ama aad rabto inaad wax dheeraad ah ka oggaato sida aad uga taageeri karto ilmahaaga farshaxanka luqada Ingiriisiga iyo xisaabta. Waa kuwan qaar ka mid ah ilaha dheeraadka ahi:

<http://tinyurl.com/ELARoadmap> & <http://tinyurl.com/MathRoadmap>

Si aad u eegto muunada su'aalaha imtixaanka: <https://tinyurl.com/ORPracticeTest>

Si aad wax badan uga akhriso natiijooyinka imtixaanka ilmahaaga: <http://tinyurl.com/ORTestResults>